

# Cafiska alaabooyinka qarxa

## Soo wac 114 14 si aad u waydiiso booliska inay soo qaadaan alaabta

**Inta u dhexaysa 15 Oktoobar 2018 iyo 11 Janaayo 2019 waxaa jiri doonta caifks alaabooyinka qarxa gudaha Sweden. Muddada wakhtigan qof kasta oo ku haysta alaabooyinka qarxa ruqsad la'aan waxa uu la xidhiidhi karaa booliska, kaas oo ka soo qaadi doona halka lagu hayo.**

Qof kasta oo booliska ula xidhiidha si aan khasab ahayn muddada cafiska laguma soo eedayn doono haysasho sharci darro ah, oo waxa uu leeyahay xaq magaciisa lagu qarinayo. Si la isaga ilaaliyo khatarta eeda, waa shuruud in boolisku ay soo qaadaan alaabta qaraxda.

### **Maxay la micno tahay alaabooyinka qarxaa?**

Tusaalooyinka alaabooyinka qarxa waxaa ka mid ah bambo gacmeeda, walxaha qarxa, qarxiyayaasha, baarruudda iyo walxaha rashka u eeg.

**Soo wac 114 14 si aad u waydiiso booliska inay u soo qaadaan alaabta si badbaado leh. Lama oggola in la keeno alaabooyinka qarxada saldhiga booliska! Taa ka sakow, waa khatar in la qaaddo alaabooyinka qarxa.**

Akhri wax badan oo ku saabsan cafiska alaabooyinka qarxa ee xaga [polisen.se/amnesti](https://polisen.se/amnesti) ama wac **114 14** haddii aad hayso wax su'aalo ah. Had iyo jeer wac 112 xaaladaha gurmada ah.